

Xeerka – Sharci, ee 5ta Maajo 1960, lamba. 4 diw.

Dejinta dheeraad ah 20%, ee la saaray canshuurta R.M.

WASIIRKA MAALIYADDA

MAAMULAHA

Markuu arkay sharciga lamba. 8, ee diw., ee 6 Febraayo 1960, taas oo Xukuumadda loogu wakiishay in ay soo-saarto góaanno la xiriira canshuuraha, sí loo helo lacagaha lagama maarmaanka in la dhiso Xoogga Dalka iyo waxyaabaha kale oo lagama maarmaanka ah madaxbannaanida Dalka ka dib; Asaga oo ku saleynayo soo-jeedinta Wasiirka Maaliyadda;

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

WUXUU XEERINAYAA:

Qod. 1

Waxaa la dejinayaa canshuur kororsiimada ah oo dhan boqolkiiba labatan oo lagu kordhinayo canshuurta dakhliga.
korarsiimada laguma dabbaqayo canshuurta dakhliga shaqada ee shaqaalaha joogtada ah, ee hoos yimaada cid ku shaqaysa.

Qod. 2

Kororsiimada waxaa lagu dabbaqayaa canshuuraha dakhliga oo la guro laga bilaabo sanadka 1960.

Qod. 3

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga ah.

Taariikhda Muqdisho, maanta, oo ah, 5ta Maajo 1960.

Maamulaha
Mario Di Stefano

Wasiirka Kowaad
Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Wasiirka Maaliyadda

Cusmaan Axmed Roble

Arkay Diwaageliyey – diw. lamba. 22, xaashi lamba. 18.

Muqdisho, 5ta Maajo 1960.

Hanti-dhowraha: **Spadaro**